

Sharciga 6 Agoosto 1970, lamba. 44.

Joojinta Xaqa Shaqa Joojinta

GUDDOOMIYHA

GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Xaashida koowad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969 lamba. 1;
Marka uu arkay qodobada 143 iyo kuwa ku xiga ee ee Xeerka Shaqada oo lagu meelmariyay D.L. 10 Agoosto 1969 lamba. 5;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la joojiyo illaa amar dambe xaqashaqa joojinta, dabcinta shaqada iyo curyaaminta shaqada, iyado la tixgalinayo baahiyo gaara ee la xariita dhismaha iyo horumarinta qaranka sida uu doonayo kacaanku;

Marka uu helay oggolaashha Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU MEELMARINAYAA XEERKA SOO SOOCO

Qod. 1

1. Xaqa shaqa joojinta, dabcinta iyo curyaaminta shaqada waa la joojiyay illaa dib looga soo celinayo;
2. Waxaa laga soo reebay kala diridda iyo mamnuucidda dhisidda qaybaha soo socda:
 - a) — ururada lagu dhisay sharciyada jira oo qabto hawlaha beeraha, warshadaha iyoganacsiga;
 - b) — ururada gooniya ee kahaysto oggolaasho gaara Golaha Sare Kacaanka am acid iyaga wakaalad ka haysta Golaha Kacaanka Gobollada iyo degmooyinka;
3. Ururada horay u jiray oo aan qabanayn hawlo beero, warshado ama ganacsi, waa in ay weydiistaan oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka 90 cisho gudahood markii uu xerkaanu dhaqan galo iyago codsi u soo gudbinaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha; Haddii oggolaashaha la diido ama uruurku uu ka maago in uu ku soo codsado mudda kor lagu soo sheegay, ururkaas isaga ah waxaa loo aqoonsanayaa mid la kala diray marka loo eego jiritaankiisa;
4. Amaahii ay lahaaayeen hay'adaha lagu kala diray xeerkaan iyo wixi hanti guurto iyo maguurtada xitaa haddii ay cid kale hayso oo iyagu ay lahaayeen, dawladda aya la waregaysa.

Qod. 2

Ururada raalli laga yahay ama la oggolaaday sida uu xeerkaanu qabo ma qaban karaan hawlo leh dabeecad siyaasadeed ama ka horjeeda mabaadiida Golaha Sare kacaanka.

Ururada ku xadgudba mamnuucidda ku xusan xeerkaan waxaa lagu kala diri karaa Dekeeto Golaha Sare Kacaanka.

Qod. 3

Cid kasta:

- a) — Abaabusha ama isku dayda in ay abaabusho in ay samayso urur xadgudub ku ah xeerkaan;
- b) — xubun ka aha urur xadgudub ku ah xeerkaan;
- c) — sameeya hawlo xadgudub ku ah qod. 2 ee xeerkaan, wuxuu mutaysanayaa haddii falku aanay keenayn dambi ka culus xabsi ah sanad illa affar sano oo xarig iyo ganaax ah Sh. Som. 1000 illaa 4000 .

Qod. 4

Xeer kasta oo ka soo horjeeda xeerkaan ama aan la jaan qadi Karin waa la laalay.

Qod. 5

Xeerkaan wuxu dhaqangalayaa 1 Maarso 1970, waxaana lagu faafinaya Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 6 Agoosto 1970.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre